# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG

## DASTUURKA DGGM

Dusamareb
June 2023

# DASTUURKA KMG EE
# DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG
# EE GOLAHA WAKIILLADU ANSIXIYEY
# JULY 28, 2015

## TUSMADA DASTUURKA

**CUTUBKA KOWAAD: MABAADI'DA GUUD .....2**
Qodobka 1aad: Mabaadi'da Guud ee DGGM .....2
Qodobka 2aad: Dhulka Dawlad Gobaleedka Galmudug .....2
Qodobka 3aad: Astaanta, Calanka iyo Heysta DGGM .....3
Qodobka 4aad: Magaala-Madaxda iyo Xarunta DGGM .....3
Qodobka 5aad: Mabaadi'da Asaasiga ah .....3
Qodobka 6aad: Sarreynta sharciga .....4

**CUTUBKA LABAAD : XUQUUQAHA IYO XORRIYAADKA ASAASIGA AH .....4**
Qodobka 7aad: Dhaqangelinta Qaanuunka Caalamiga .....4
Qodobka 8aad: Xaqa nolosha .....4
Qodobka 9aad: Xaqa xorriyadda iyo Nabad-Gelinta .....4
Qodobka 10aad: Xaqa Hoyga .....5
Qodobka 11aad: Xaqa Sinnaanta iyo Caddaaladda .....5
Qodobka 12aad: Xaqa Wax-barashada .....5
Qodobka 13aad: Xaqa Shaqada .....5
Qodobka 14aad: Xaqa Caafimaadka .....6
Qodobka 15aad: Xaqa Daryeelka Qoyska, Haweenka iyo Caruurta .....6
Qodobka 16aad: Xuquuqda Naafada .....6
Qodobka 17aad: Mas'uuliyadda Ciqaabta .....6
Qodobka 18aad: Xaqa Eedeysanaha, Dacwada iyo Is-difaaca .....7
Qodobka 19aad: Xaqa dhaqaaqa iyo Safarada .....7
Qodobka 20aad: Xaqa Cabbiridda fikirka, Hadalka iyo Hal-abuurka .....7
Qodobka 21aad: Xuquuqda Warbaahinta .....8
Qodobka 22aad: Xaqa Hantida gaarka ah .....8
Qodobka 23aad: Xaqa Deegaanka (Bii'ada) .....8
Qodobka 24aad: Xaqa Sameynta Urur Bulsho iyo ka Qeybgal Bannaan-bax .....8
Qodobka 25aad: Xaqa Ka qeybgalka Siyaasadda iyo Doorashada .....8
Qodobka 26aad: Waajibaadka Muwaadinka .....9

**CUTUBKA SEDDAXAAD: QAAB- DHISMEEDKA DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG (DGGM) .....9**
Qodobka 27aad: Fidinta Awoodaha Maamul ee DGGM .....9
Qodobka 28aad: Golaha Wakiillada Galmudug .....10
Qodobka 29aad: Shuruudaha ka mid noqoshada Golaha Wakiillada .....10
Qodobka 30aad: Luminta Xildhibaannimada Golaha Wakiillada .....10
Qodobka 31aad: Buuxinta Kuraasta Golaha Wakiillada .....10
Qodobka 32aad: Muddada Golaha Wakiillada .....10
Qodobka 33aad: Awoodaha Golaha Wakiillada .....11
Qodobka 34aad: Faafinta iyo Xafidaadda Shuruucda .....11
Qodobka 35aad: Dhaqan-gelidda Shuruucda .....11
Qodobka 36aad: Durid Sharci .....12
Qodobka 37aad: Guddiyadda Golaha Wakiillada .....12
Qodobka 38aad: Guddiga Arrimaha Golaha .....12
Qodobka 39aad: Kal-fadhiyada Golaha Wakiillada .....12
Qodobka 40aad: Xasaannadda Xildhibaanka Golaha Wakiillada .....13
Qodobka 41aad: Dhaarta Dastuuriga ah .....14
Qodobka 42aad: Kala dirista Goloha Wakiillada .....14
Qodobka 43aad: Guddoomiyaha iyo ku xigeenada Golaha Wakiillada .....14
Qodobka 44aad: Qaab-Dhismeedka Golaha Fulinta .....14
Qodobka 45aad: Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka DGGM .....15
Qodobka 46aad: Shuruudaha Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka .....15

Qodobka 47aad: Doorashada Madaxweynaha DGGM iyo Ku-xigeenkiisa ....15
Qodobka 48aad: La Wareegidda Xilka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa ....16
Qodobka 49aad: Muddada Xilka Madaxweynaha ....16
Qodobka 50aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Madaxweynaha DGGM ....16
Qodobka 51aad: Luminta Xilka Madaxweynaha ....17
Qodobka 52aad: Xil ka qaadista Madaxweynaha ....17
Qodobka 53aad: Sii haynta Xilka Madaxtooyada ....17
Qodobka 54aad: Xilka Madaxweyne Ku-xigeenka ....17
Qodobka 55aad: Magaabidda Golaha Fulinta ....18
Qodobka 56aad: Shuruudaha kamid noqoshada Golaha Wasiirada ....18
Qodobka 57aad: Xilka iyo Waajibaadka Golaha Wasiirada ....18
Qodobka 58aad: Golaha Dhaqanka Galmudug ....19
Qodobka 59aad: Kamid-Noqoshada Golaha Dhaqanka GM Shuruudaha kamid noqoshada Golaha Dhaqanku waa: ....19
Qodobka 60aad: Tirada Golaha Dhaqanka Galmudug....19
Qodobka 61aad: Awoodda iyo Waajibaadka Golaha Dhaqanka ....19
Qodobka 62aad: Fadhiyada Golaha Dhaqanka Galmudug....20
Qodobka 63aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Dhaqanka....20
Qodobka 64aad: Golaha Garsoorka Galmudug ....20
Qodobka 65aad: Qaab-Dhismeedka Garsoorka DGGM....20
Qodobka 66aad: Howlaha Garsoorka DGGM....20

**CUTUBKA AFARAAD: HAY'ADAHA IYO GUDDIYADA MADAXA BANNAAN ....21**
Qodobka 67aad: Hay'adaha Dawliga ee Madaxa-bannaan....21
Qodobka 68aad: Guddiyada Madaxa-bannaan ....21

**CUTUBKA SHANAAD: CIIDAMADA NABAD-GELYADA DGGM ....22**
Qodobka 69aad: Dhismaha Ciimada Nabad-gelyada DGGM....22

**CUTUBKA LIXAAD: DOORASHOOYINKA DGGM ....22**
Qodobka 70aad: Heerarka Doorashooyinka DGGM ....22

**CUTUBKA TODOBAAD: XILLIGA KALA GUURKA IYO DHAQAN-GALKA DASTUURKA ....23**
**Qodobka 71aad: Ansixinta iyo Wax-kabeddelka Dastuurka DGGM ....23**
Qodobka 72aad: Dhaqan-galka Dastuurka DGGM ....23

**LIFAAQYO (ANNEXES): ....24**

**DASTUURKA DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG (DGGM)**

**Hordhac;**

Iyada oo la raacayo Tilmaamaha Qodobada 48aad, 49aad, 120aad iyo 121aad ee Dastuurka JFS, Go'aankii Saxiixa-yaasha Dhismihii Galmudug iyo Wareegtadii lagu Magacaabay Guddiga farsamada ee Maamul u Sameynta Gobalada dhexe ee ku taariikhaysnaa 30/07/2014, ee lagu heshiiyey Dhismaha Maamul Gobaleed ka kooban Mudug iyo Galgaduud iyo Sammeynta Dastuur KMG ah oo ay yeelato DGGM.

Dastuurkaan ayaa ku saleysan Shareecada Islaamka, Dhaqanka Suuban, Nidaam ku dhisan Caddaalad, Nabad, Tala-wadaag, Dimoqoraadiyad iyo Hannaan Xisbiyo badan.

Dastuurka KMG ee DGGM ayaa ah Sharciga ugu sarreeya Shuruucda DGGM sida ku cad Mabaadi'da Dastuurka iyo Qaab-dhismeedka Nidaamka Dawliga ah iyo Awaamirta uu tilmaamayo Dastuuka DGGM, waxaana Saldhig u ah Shareecada Islaamka iyo Dastuurka JFS, waxa uuna ku dhisanyahay Mabda'a qaybinta Awoodaha sida; Hay'adaha Wakiillada, Fulinta iyo Garsoorka, waxaana saldhig u ah Mabda'a Aaya ka talinta, Ismaamulka iyo Sarreynta Sharciga si loo xaqiijiyo rabitaanka Shacabka DGGM loona gaaro Horumar iyo Caddaalad.

Golaha Wakiillada Galmudug ayaa Ansixiyey Dastuurka KMG July 28, 2015, kadib Oggolaashaha Ergadii Beelaha Galmudug ee dhistay Maamulka Galmudug May 2015.
Dhismihii Golaha Wakiillada 2aad ee Galmudug kadib ayuu Fadhigiisii Koowaad ee ku qabsoomay Caasimadda Galmudug ee Dhusamareb bishii Jannaayo 2020, ku Ansixiyey Dastuurka KMG si uu mar kale u noqdo Dhaqan-gal.

Golaha Wakiillada Galmudug oo gudanaya Awoodaha Qodobka 33aad iyo Habraaca Qodobka 71aad ee Dastuurka KMG Galmudud ayaa dib u eegis iyo wax ka-beddel ku sameeyey qaar ka mid ah Qodobada Dastuurka KMG ee Galmudug.

Kalfadhigii 7aad, Kulankiisii 7aad ee 17 Juun 2023, Ayuu Golaha Wakiilladu ku Ansixiyey Cod Aqlabiyad ah Soo-jeedintii Guddiga Joogta Golaha ee Wax ka-beddelka Qodobada aan la jaan-qaadi karin Geedi-Socodka Himmilada Galmudugta Cusub.

# CUTUBKA KOWAAD

# MABAADI'DA GUUD

## Qodobka 1aad: Mabaadi'da Guud ee DGGM

1. Dawlad Gobaleedka Galmudug "DGGM" waa Dawlad Gobaleed ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya "JFS".
2. Bulshada Galmudug waa Muslim Sunni ah, lagumana faafin karo diin kale oo aan aheyn Islaam Sunni ah.
3. Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug waxaa Saldhig u ah Shareecada Islaamka iyo Dastuurka JFS, wixii ka hor imaanayana waa waxba kama jiraan.
4. Dawlad Gobaleedka Glmudug, waxa ay ku dhisantahay Rabitaanka Shacabka Gobalada Mudug iyo Galgaduud.
   A. Dawlad Gobaleedka Glmudug (DGGM) waxa ay u madax-bannaantahay Is-Maamulideeda Gudaha, si waafaqsan Dastuurka JFS Qodobadiisa; 48aad, 49aad, 120aad iyo 121aad.
   B. Awoodaha Maamulka DGGM waxaa leh Dadweynaha Gobalada Galgaduud iyo Mudug, waxa ayna u wakiilana-yaan Wakiiladooda ay ku soo doorteen Hannaanka Dimoqraadiga xisbiyada badan si waafaqsan Dastuurka iyo Shuruucda Doorashooyinka Galmudug.

## Qodobka 2aad: Dhulka Dawlad Gobaleedka Galmudug

1. Dhulka DGGM waxa uu ka koobmaa Gobalada Galgaduud iyo Mudug; (Biyabadeedka, Berriga iyo Hawada sare).
2. DGGM waxa ay dib-u-eegis iyo qiimeyn ku sameyneysaa deegaannada Galgaduud iyo Mudug, si waafaqsan Dastuurka JFS, waxaana la sameynayaa nidaam sharci oo lagu dhisayo goballo, degmooyin iyo xudduudahooda.
3. Dhismayaasha Gobalada iyo degmooyinka cusub waxaa soo jeedinaya Xukuumadda DGGM waxaana Ansixinaya Golaha Wakiillada DGGM.
4. Soohdimaha dhuleed ee DGGM waa; Waqooyi Puntland, Bari Xeebta Badweynta Hindiya, Galbeed Xadka Dalka Itoobiya, Koonfur DG Hirshabeelle.
5. Xudduudaha Gobalada waxaa si kumeel -gaar ah loogu dhaqmayaa xudduudihii Gobalada dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya, sida ku cad Soohdimaha xudduudihii jiray xilligii Dawladdii dhexe ee Soomaaliya ka hor 1990 kii, ay ku kala calaamadisay Goballada Jamhuuriyadda Soomaaliya sida ku qeexan qodobka 49aad faqradiisa 5aad ee DJFS.

6. Khilaafaadka Xudduudaha waxa lagu xallinayaa soo-jeedinta Guddiga Madaxa bannaan ee Xudduudaha iyo Federaalka JFS sida ku cad Dastuurka JFS Qodkiisa 111aad, Faqradiisa 5aad.
7. DGGM waxa ay soo dhaweynaysaa Gobal kasta ama Deegaan kasta oo ay deganyihiin bulsho cayiman, aqlabiyadda Shacabkeeduna doonayaan in ay la midoobaan DGGM, si ku dhisan is afgarad iyo heshiis aan wax loogu dhimeynin Dawlad Gobaleed kale, kana hor imaanayn Dastuurka JFS, Qodobkiisa 49aad, Faqradiisa 6aad.

## Qodobka 3aad: Astaanta, Calanka iyo Heysta DGGM

1. Astaanta u gaarka ah DGGM waa midda ku qeexan lifaaqa (A.).
2. Calanka DGGM waa midka ku qeexan lifaaqa (A.).
3. Calanku waxa uu yeelanayaa Hees u asteysan, waxaana ansixinaya Golaha Wakiillada GM.

## Qodobka 4aad: Magaala-Madaxda iyo Xarunta DGGM

1. Magaala-Madaxda Dawlad Gobaleedka Galmudug waa; Dhusamareb.
2. Magaala-Madaxda DGGM waxa ay yeelaneysaa Sharci gaar ah oo uu soo saarayo Golaha Wakiillada Galmudug.

## Qodobka 5aad: Mabaadi'da Asaasiga ah

1. Nidaamka DGGM waxa uu ku saleysan-yahay hannaan dimoqoraadi ku dhisan matalaada dadweynaha, awoodda oo dhanna uu leeyahay shacabku, nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulsho loo wada dhanyahay.
2. DGGM waxa ay hirgelineysaa mabaadi'da qeybinta awoodaha; waxaana jiraya seddax awoodood oo siman, hadaf mideysanna leh, isna dhammeystiraya; wadashaqeyn-tooduna ku dhisantahay; daah furnaansho iyo isla xisaabtan, seddaxda awood oo kala ah:
    a) Awoodda Golaha Wakiillada
    b) Awoodda Golaha Fulinta
    c) Iyo Awoodda Golaha Garsoorka.
3. DGGM waxa ay hirgelinaysaa xuquuqda aadanaha, kala-dambeynta sharciga, xeerarka caalamiga, caddaalad, wadatashi siyaasadeed oo bulshadu u wada dhantahay iyo qeybinta seddaxda awoodood, si loo helo hannaan daah furan, loona daryeelo danta guud ee shacabka DGGM.
4. Haweenka ayaa si buuxda uga qeyb-gelaya dhammaan hay'adaha la soo doorto ama lasoo xulo ama la magacaabo ee seddaxda awooddood, Hey'adaha dawliga iyo Guddiyada madaxa-bannaan, waxa ayna yeelanayaan saami dhan 30%.
5. DGGM iyo Dawlada Federalka Soomaaliya waxa ay iska kaashana-yaan dhamaystirka arrimaha masiiriga ah ee u baahan wada-xaajood iyo wadar-ogal siyaasadeed iyo dhamaystirka Dastuurka JFS.

### Qodobka 6aad: Sarreynta sharciga

1. Sharciga ayaa ka sarreeya qof kasta, hay'ad kasta ee dawladeed iyo mas'uuliyiinta DGGM, waxa ayna u wada hoggaan-samayaan dastuurka iyo shuruucda JFS iyo dastuurka iyo shuruucda DGGM.
2. Kadib Shareecada Islaamka Dastuurka DGGM ayaa ugu sarreeya shuruucda Dawlad Gobaleedka Galmudug, Sharci lagu beddeli karo, lagu laali karo ama lagu jabin karo ma jiro, Sharci kasta oo ka hor imaanayana waa waxba- kama jiraan, marka laga reebo Shuruucda waafaqsan Dastuurka JFS.
3. Dastuurka DGGM waxa uu dhaqangelin-siinayaa, una hoggaansamayaa Dastuurka JFS iyo Shuruucda JFS.
4. DGGM waxa ay sammeysaneysaa Shuruuc laga hirgelinnayo deegaannadeeda oo u gaar ah, kana hor immaanayn Shuruucda JFS.

## CUTUBKA LABAAD
## XUQUUQAHA IYO XORRIYAADKA ASAASIGA AH

### Qodobka 7aad: Dhaqangelinta Qaanuunka Caalamiga

DGGM waxa ay aqoonsantahay, dhaqangeli-neysaa Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda aadanaha, Qaanuunka caalamiga, heshiisyada, hab-maamuusyada la aqoonsanyahay iyo qodobada cutubka labaad ee dastuurka JFS ee xuquuqaha asaasiga muwaadinka;

a) Xuquuqaha ku cad Cutubkaan labaad ee dastuurka DGGM ilaalintooda iyo dhaqangelin-toodu waa mas'uuliyad saaran dhammaan heerarka maamul ee DGGM, maamullada Gobalada iyo Degmooyinka.
b) DGGM waxa ay awood dhaqan-gelin sharci siinaysaa dhammaan xuquuqaha dastuurka JFS uu siiyey muwaadinka iyo qofka, sida ku cad cutubka labaad Qodobadiisa 10aad ilaa 35aad.
c) DGGM waxa ay dhaqan-gelin-siinaysaa shuruucda caalamiga, Axdiyada caalamiga iyo kuwa heer gobal ee JFS dhinac ka tahay, baarlamaanka Soomaaliyana dhaqan-gelin siiyay.

### Qodobka 8aad: Xaqa nolosha

Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay nolol iyo in loo dhawro xaqa noloshiisa.

### Qodobka 9aad: Xaqa xorriyadda iyo Nabad-Gelinta

1. Qof kastaa waa xor, waxa uuna xaq u leeyahay madax-bannaanida xorriyaddiisa shaqsiga ah, qofna lama adoonsankaro lama lahaan karo, lagumana shaqeysan karo si sharci-darro ah.
2. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabad-gelyada qofnimadiisa:

a. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo amni uu ku noolaado, nabad-gelinta qofnimadiisa iyo bad-qabka jirkiisa, waxaana ka reeban jirdil iyo ciqaab ku saleysan naceeb.
b. Waxaa reeban gudniinka fircooniga ee Gabdhaha iyo tacaddiga jirkooda.
c. Waxaa reeban soo tuuridda ilmaha uurka ku jira, marka laga reebo xaaladaha caafimaad ee uu xaqiijiyay dhaqtar lagu kalsoonyahay, laguna badbaadinayo nolosha hooyada.

## Qodobka 10aad: Xaqa Hoyga

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu helo hoy u gaar ah iyo xurmadda hoygiisa.
2. Qofna hoygiisa laguma xad gudbi karo, lama geli karo amar la'aan, lama baari karo sharci la'aan aan amar cad looga wadan Maxkamadda awoodda u leh soo saaridda amarka ee heer DGGM ama JFS.
3. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay arrimihiisa gaarka u ah in aan laga faragelin, wixii aan ka hor imaaneyn shareecada islaamka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyed.

## Qodobka 11aad: Xaqa Sinnaanta iyo Caddaaladda

1. Muwaadiniinta DGGM waa simanyihiin iyada oo aan loo eegin jinsi, abtirsiimo, midab, luqad, muuqaal, fikir, siyaasad iyo xaalad gaar ah oo qof ama bulsho ku sugantahay.
2. Shacabka DGGM waa shacab siman, si simanna ugu wada noolaanaya dhulka iyo nidaamka DGGM,ugana wada faa'iideysanaya kheyraadka dhulka si siman oo waafaqsan shuruucda DGGM iyo JFS.
3. Xaqa sinnaanta Caddaaladda, Shacabka DGGM waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan caddaalad ay u simanyihiin, garsoor caadil ah, sharciga hortiisana ay u sinnaadaan, si la mid ahna shaqada iyo ka faa'iideysiga kheyraadka.

## Qodobka 12aad: Xaqa Wax-barashada

Muwaadin kasta ee ka tirsan DGGM, waxa uu xaq u leeyahay in uu helo wax barasho tayo leh ee dugsi Hoose/Dhexe iyo Sare oo lacag la'aan ah.

## Qodobka 13aad: Xaqa Shaqada

1. Muwaadiniinta DGGM, waxa ay xaq u leeyihiin helitaanka shaqo iyo mushaar u dhigma shaqadooda, waxna aan u dhimeynin sharafkooda:
   a. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu shaqeeyo, loogana faa'iidaysan si xaq darro ah muruqiisa.
   b. Qof kasta oo shaqaale ah waxa uu xaq u leeyahay in uu sameeyo urur shaqaale ama ka mid noqdo ururrada shaqaalaha.
   c. Qof kasta oo shaqaale ah waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo bannaan-bax ama ka qeyb qaato abaabul bannaan-bax si nabad ah.

d. Dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenku waxa ay yeelanayaan xuquuq gaar ahoo lagu dhawrayo sharaftooda, loogana ilaalinayo ku xad-gudub jinsiyadeed, si ay u gutaan waajibaad-kooda shaqo.
e. Shaqaale kastaa waxa uu xaq u leeyahay shaqo-joojin.
f. Urur shaqaale ama loo-shaqeeye-yaashu waxa ay xaq u leeyihiin in ay galaan gorgortan-wadareed ku saabsan arrimaha shaqada.

2. DGGM waxa ay soo saareysaa sharciga shaqada iyo shaqaalaha oo aan ka hor-immaaneyn Dastuurka iyo shuruucda shaqada iyo shaqaalaha JFS.

### Qodobka 14aad: Xaqa Caafimaadka

Muwaadiniinta DGGM waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan adeeg caafimaad oo tayo leh iyo in loo fidiyo adeegyo caafimaad xilliyada xaaladaha deg dega ah iyo adeeg caafimaad oo gaar ah in loo fidiyo naafada iyo saboolka, adeegaas oo u qalma adeegyada ay helaan muwaadiniinta soomaaliya meel kasta oo ay joogaan.

### Qodobka 15aad: Xaqa Daryeelka Qoyska, Haweenka iyo Caruurta

Xanaanada hooyada iyo caruurtu waa waajib sharci ah oo saaran DGGM;

a) Waalidka waxaa saaran daryeelka, bar-baarinta iyo wax-baridda caruurtiisa.
b) Qofka qaangaarka ah waxaa saaran waajibka xannaaneynta waalidkiis, haddii waalidku uusan is kaabi-karin sababo caafimaad, dhaqaale ama gabow.
c) Qoysku waxa uu ka dhismaa lab iyo dheddig ku heshiiya guur si waafaqsan shareecada Islaamaka.
d) Guurku sharci ma noqonayo haddii labada dhinac midkood aanu raali ka aheyn ama midkood uusan gaarin da'da guurka, si waafaqsan shareecada islaamka.
e) Caruurta waa in loola dhaqmaa si waafaqsan qodobka 29aad ee dastuurka JFS iyo xeerarka caalamiga ee JFS siisay dhaqangelin awoodeed.

### Qodobka 16aad: Xuquuqda Naafada

1. DGGM waxa ay muhiimad gaar ah siinaysaa daryeelka naafada iyo in aan lagu xad-gudbin xuquuqdooda asaasiga ah.
2. DGGM waxa ay naafada u sameynaysaa daryeel caafimaad, xannaano, wax-barasho, bixin qalabyo casri ah iyo xirfado ay ku shaqeysan-karaan, waxa ayna u abuureysaa fursado shaqo ay ka shaqeysan-karaan.

### Qodobka 17aad: Mas'uuliyadda Ciqaabta

1. Mas'uuliyadda ciqaabtu waa shakhsi, qofna looma ciqaabi karo fal-dambiyeed uu geystay qof kale, waxaana reeban mas'uuliyad ciqaab-wadareed la muteysto iyo ciqaab ku saleysan naceeb gaar ah.

2. Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay sharcigu dembi u aqoon, qofna laguma xakumi karo ciqaab aan lagu tilmaamin sharciga.

### Qodobka 18aad: Xaqa Eedeysanaha, Dacwada iyo Is-difaaca

1. Qof kastaa waa bari' (dambi laawe), eedaysanuhu waa Bari' dambi laawe ah ilaa maxakamad si kama dambeys ah ugu xukunto dambiile.
2. Qof kasta oo xorriyadiisa laga qaado lana xiro, waa in 24 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwaddiisa, waana in sida ugu dhaqsiyaha badan loogu sheego waxa lagu soo eedeeyey.
3. Qof kasta ee la xiro waxa uu xaq u leeyahay in wargelin loogu sameeyo shakhsiyaadka uu dalbo, turjubaan, daryeel cafimaad, dhaqtar, qareen iyo maxkamad awood qaanuun u leh dhageysiga dacwaddiisa, garsoor caadil ah iyo hannaan dacwo qaadis dhameystiran.
4. Baarista dacwadu 60 maalmood ka badan ma socon-karto, haddii eedaysanaha lagu cadeyn waayo dambiga waa in galka dacwada la xiro eedaysanahana la sii daayo, haddii hay'adaha amniga daneeya ay hayaan eedaysanaha waqti mudadaas ka badan waa in ay hor-geeyaan garsoore sababo maangal ah.
5. Muwaadinka DGGM ee aan awoodin in uu u yeerto wakiil sharci oo difaaca, waxa uu xaq u leeyahay in loo qabto qareen maxkamada horteeda ka difaaca.
6. Qof kasta oo xorriyadiisa laga qaado waxa uu xaq u leeyahay in lagu xiro goob ku habboon nolosha aadanaha, kana heli karo biyo, cunto, hooy iyo akhbaaraad.
7. Qof kasta oo xorriyaddiisa laga qaado waxa uu xaq u leeyahay in uu iska difaaco eedaymaha loo soo jeediyey iyo cadeymaha lasoo hordhigay, qofna laguma qasbi karo dambi-qirasho.
8. Qof kasta oo dacwad lagu soo oogo waxa uu xaq u leeyahay xuquuqaha ku xusan qodobkaan 18aad ee dastuurka DGGM.

### Qodobka 19aad: Xaqa dhaqaaqa iyo Safarada

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu u safro halka uu doono, kuna soo noqdo hoygiisa marka uu doono, uuna doorto in uu dego halka uu doono, sida ku xusan qodobka 21aad ee dastuurka JFS.
2. DGGM waxa ay muwaadin-keeda u sahlaysaa helidda dukuumiinti sharci uu ku safro, kana qaato deegaankiisa dukumiinti kasoo baxay JFS.

### Qodobka 20aad: Xaqa Cabbiridda fikirka, Hadalka iyo Hal-abuurka

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay cabbirid fikirkiisa, hadal jeedin, hal abuur-sameyn, loomana xadeyn-karo.
2. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyhay in uu ka hadlo aragtidiisa meel fagaaro ah, war-baahin ku qoro, kusoo saaro buug ama riwaayad ama filim ama warbaahin elektaroonig ah.

3. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay soo bandhigidda hal-abuur aan wax loogu dhimeyn shaqsi, koox ama bulsho kale.

### Qodobka 21aad: Xuquuqda Warbaahinta

Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu sameysto war-baahin gaar ah ama ka hadlo war-baahin isaga oo aragtidiisa ka jeedinaya ama ka difaacaya, war-baahinta lama xaddidi karo tiradooda iyo hannaanka shaqadooda, iyada oo la raacayo si waafaqsan dastuurka iyo shuruucda DGGM iyo JFS.

### Qodobka 22aad: Xaqa Hantida gaarka ah

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho hanti u gaar ah, isticmaalo, ku raaxeysto, iska-gado ama wareejiyo si waafaqsan dastuurka JFS qodobkiisa 26aad.
2. DGGM waxa ay la wareegi kartaa hanti gaar ah, haddii ujeedadu tahay danta guud ee DGGM ama JFS.
3. Qof kasta oo hantidiisa ay la wareegto DGGM ama JFS iyada oo la raacayo danta guud waa in uu helaa mag-dhaw caadil ah oo ay qiimeeyaan guddi xeel- dheere-yaal ah, maxkamad ama qaab ay DGGM iyo JFS isku waafaqaan.

### Qodobka 23aad: Xaqa Deegaanka (Bii'ada)

1. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay bii'ad nadiif ah oo aan waxba u dhimeyn caafimaadkiisa iyo in laga ilaaliyo bii'ad wasakhaysan.
2. Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu qeybtiisa ka helo kheyraadka DGGM, laguna xadgudbin lana khasaarin kheyraadka deegaankiisa.
3. DGGM waxa ay soo saareysaa nidaam sharci lagu dhawrayo bii'ada, kana hor-imaaneyn shuruucda bii'ada JFS.

### Qodobka 24aad: Xaqa Sameynta Urur Bulsho iyo ka Qeybgal Bannaan-bax

1. Muwaadin kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro urur bulsho si waafaqsan sharciga ama xubin ka noqdo.
2. Muwaadin kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo kulamo kana qeyb galo, umana baahna ogolaashaha xukuumadda sida ku xusan qodobka 20aad ee dastuurka JFS.
3. Muwaadin kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo ama ka qeyb qaato bannaan-bax nabadeed.

### Qodobka 25aad: Xaqa Ka qeybgalka Siyaasadda iyo Doorashada

1. Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu ka qayb-galo hawlaha siyaasadda heer dawlada DGGM ama heer JFS, Xaqa siyaasadda muwaadinka lama xadeyn-karo lamana laalli karo.

2. Muwaadin kastaa waxa uu furan karaa xisbi siyaasadeed ama xubin ka noqon-karaa isaga oo raacaya shuruucda DGGM iyo JFS.
3. Muwaadin kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu wax doorto ama la doorto si waafaqsan sharciga doorashada heer DGGM, ama heer JFS.
4. DGGM, waxa ay soo saareysaa sharciga xisbiyada siyaasadda iyo sharciga doorashada ee heer DGGM.

### Qodobka 26aad: Waajibaadka Muwaadinka

1. Muwaadin kasta ee ku nool DGGM waxaa Waajib ku ah ilaalinta nidaamka iyo shuruucda DGGM iyo JFS, ka qeyb qaadashada xasilinta ammaanka iyo deganaa-shaha deegaanka iyo horumarinta dhaqaalaha DGGM.
2. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah dhawrista sharcuucda iyo xeerarka DGGM iyo JFS.
3. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah bixinta canshuuraha DGGM iyo JFS.
4. Muwaadin kasta waxaa waajib ku ah difaaca dalka, diinta iyo dadka iyo bixinta tabarucaadka looga baahdo.

## CUTUBKA SEDDAXAAD

## QAAB-DHISMEEDKA DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG (DGGM)

### Qodobka 27aad: Fidinta Awoodaha Maamul ee DGGM

1. Awoodaha Maamul ee DGGM waxaa lagu baahinayaa Goballada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka; waxaana jiraya Gole Wakiillo iyo Goleyaal Deegaan ee lagu soo doorto heer dawladaha hoose oo yeelanaya Guddoomiye iyo Ku xigeen.
2. Heer kasta ee deegaan waxa uu yeelanayaa maamul ku imaanaya doorasho xor ah, ku saleysan nidaamka axsaabta badan, shacabku ay ku doortaan Wakiilo Matala oo lagu doorto si xor iyo xalaal ah iyo codeyn qarsoodi ah;
    a) Gobalku waxa uu ka koobmaa; degmooyin, tuulooyin iyo daabiyado, awoodda is maamulidda waxaa la gaarsiinayaa heer ay daabiyaddu soo doorato Wakiiladeeda Matalaya.
    b) DGGM waxaa laga hirgelinayaa nidaamka dimoqoraadiga ee xisbiyada badan oo lagu dooranayo hoggaanka DGGM iyo dawladaha hoose sida ku xusan qodobka 1aad, faqradiisa 1aad ee dastuurka JFS.
    c) Nidaamka iyo shuruucda maamulka Gobalada iyo Degmooyinka kudhismayaan waxaa lagu soo saarayaa sharci gaar ah.

### Qodobka 28aad: Golaha Wakiillada Galmudug

1. Golaha Wakiillada Galmudug (GWGM) ayaa Mas'uul ka ah Sharci-dejinta DGGM, Awoodahooda Xileedna waa; Matalaadda Shacabka, Sharci-dejinta iyo kor-joogteynta Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Galmudug.
2. Golaha Wakiillada waxa uu ka kooban yahay; (**89)** Sideetan iyo Sagaal Xildhibaan,waxaana soo dooranaya Shacabka DGGM.

### Qodobka 29aad: Shuruudaha ka mid noqoshada Golaha Wakiillada

Xildhibaannimada Golaha Wakiillada ee Galmudug waxaa loo dooran karaa muwaadin kasta ee degan deegaanada Galmudug ee buuxiya shuruudaha doorashada sida:

a) In uu yahay muslim ku dhaqma diinta islaamka
b) In da'diisu aysan ka yareen 25 sano kana weynayn 75 sano.
c) In uu maskax ahaan caafimaad qabo.
d) In uu yahay Soomaali, deegaan ku ah mid ka mid ah deegaannada Galmudug, lehna xuquuqda cod-bixinta.
e) In aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo go'aan maxkmadeed oo kama dambays ah lagu hakin shantii (5) sano ee ugu dambaysay.
f) Iyo in aqoontiisu aysan ka yareyn heer dugsi sare ama aqoon iyo waaya aragnimo aan ka yareyn 5 sano.

### Qodobka 30aad: Luminta Xildhibaannimada Golaha Wakiillada

Xildhibaanku waxa uu xilkiisa ku waayi karaa xaaladaha soo socda:

1. Haddii uu iska casilo xilka xildhibaannimada.
2. Haddii uu geeriyoodo xildhibaanku.
3. Haddii uu beelo maskaxda ama xanuun aan lala shaqeyn karin uu ku yimaado.
4. Haddii uu Xildhibaanku aqbalo Xil dawladeed aan ka ahayn; Wasiir, Wasiiru dawle iyo Wasiir ku xigeen.
5. Haddii la hakiyo xuquuqdiisa muwaaddinnimo sida ku cad Shuruucda DGGM.
6. Ka-maqnaasha laba kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga iyada oo aysan jirin sabab maan-gal ah.

### Qodobka 31aad: Buuxinta Kuraasta Golaha Wakiillada

Haddii xubin banneyso xilka GWGM, sida ku xusan Qodobka 30aad, waxaa loo raacayaa Hannaanka Sharciga Doorashada DGGM, waxaana fulinaya GMDG.

### Qodobka 32aad: Muddada Golaha Wakiillada

1. Mudda xileedka Golaha Wakiillada waa 5 sano ka bilaabata marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, lana dhaariyo xildhibaanada.

2. Fadhiga koowaad ee Golaha Wakiillada waa in lagu qabtaa 7 cisho gudahooda kadib ku dhawaaqidda natiijada.
3. Ka hor dhammaadka mudda xileedka Golaha Wakiillada waxaa la dooranayaa Gole Wakiillo cusub.

### Qodobka 33aad: Awoodaha Golaha Wakiillada

1. Golaha Wakiillada xilkooda waajib gudasho waa:
    a) Diyaarinta, ka doodista iyo ansaxinta Shuruucda DGGM.
    b) Wax ka-beddelidda Dastuurka DGGM marka laga reebo qodobada asaasiga ee ku xusan Cutubka koowaad iyo cutubka labaada ee Xuquuqda iyo Xorriyaadka.
    c) Doorashada iyo xil ka qaadidda Guddoonka Golaha.
    d) Doorashada iyo xil ka qaadidda Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa.
    e) U codeynta iyo Ansixinta Guddiyada Joogtada Golaha iyo kala laabashada Codka.
    f) Ansixinta Xubnaha iyo Barnaamijka Xukuumadda uu Madaxwaynuhu soo magacaabo, cod hal-dheeri ah.
    g) Ka doodista iyo Ansixinta Miisaaniyad-sanadeedka iyo Meel-marinta xisaab-xir sanadeedka.
    h) Ansixinta ama laalidda xaaladaha deg dega ah ee Xukuumaddu soo jeediso.
    i) Ka doodista iyo Ansaxinta Hindise Sharciyeedyada ay Xukuumadu soo qadimto.
    j) Ka doodista iyo Ansaxinta Mooshinada laga keeno Guddoonka Golaha, Madaxweynaha iyo Ku xegeenkiisa ee DGGM.
    k) U Codeynta ama diidmada Ansixinta dhismo Degmooyin iyo Goballo Cusub.
    l) U Codeynta ama diidmada Haya’adaha dawliga ee madaxa-bannaan iyo Guddiyada Madaxa-bannaan.
    m) La xisaabtanka Xukuumadda, kormeeridda, baarista iyo wax-weydiimo Xubnaha Xukuumadda, Hay’adaha Madaxa-bannaan iyo Gudiyada Madaxa-bannaan.
2. Golaha Wakiilladu waxa ay amri karaan in baaris lagu sameeyo Hey’ad dawladeed kasta, iyaga oo gudashada waajibkaas u xilsaaraya guddi xildhibaano khibrad u leh hawlaha la baarayo.

### Qodobka 34aad: Faafinta iyo Xafidaadda Shuruucda

Kaydka shuruucda DGGM waxaa mas’uul ka ah xoghayaha Golaha Wakiillada iyo Garyaqaanka Guud ee Dawlad Gobaleedka Galmudug oo faafinta rasmiga ah kusoo saaraya

### Qodobka 35aad: Dhaqan-gelidda Shuruucda

1. Hindise-sharci qabyo ah waxa uu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta, Madaxweynaha DGGM na saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

2. Haddii Golaha Wakiilada Galmudug diido Hindise- sharciyeed, laguma soo celin karo Golaha muddo 30 Malmood ah laga bilaabo Maalinta Hindisaha la diiday.

### Qodobka 36aad: Durid Sharci

1. Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada iyo dhaqan-gelidda waxaa lagu durikaraa oo keliya in uu ka soo horjeedo Dastuurka DGGM ama Dastuurka JFS.
2. Sharci maray shuruudaha ku xusan Qodobadan waxaa duri kara:
   a) Seddax meelood meel ka mid ah Xildhibaannada Golaha Wakiillada
   b) Golaha Wasiirrada DGGM;
   c) Ugu yaraan laba kun (2,000) oo cod bixiye oo diiwaan-gashan.
3. Duridda sharci si waafaqsan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobkan waxaa la hor-geyn-karaa go'aanna ka gaari kara Maxkamadda Dastuuriga ee Federaalka keliya.
4. Haddii Maxkamadda Dastuurigu ay jebiso duriddii sharciga, kharashka ku baxaywaxaa bixinaya dhinicii hindisaha duridda hor-geeyey Maxkammadda.
5. Habraaca loo marayo duridda iyo go'aan ka-gaarista waxaa lagu qeexayaa nidaamka garsoorka ee heer Federaal.

### Qodobka 37aad: Guddiyadda Golaha Wakiillada

1. Golaha Wakiilladu waxa uu yeelanayaa guddiyo socod-siiya hawlaha Golaha.
2. Guddiyada tiradooda, habka xulistooda iyo nidaamkooda shaqada waxaa laguqeexayaa xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada.

### Qodobka 38aad: Guddiga Arrimaha Golaha

1. Golaha Wakiilladu waxa uu yeelanayaa Guddiga Arrimaha Golaha, Xubnaha Guddiga Arrimaha Golaha waa Guddoomiyaha, kuxigeennadiisa iyo Guddoomiye-yaasha Guddiyada Joogtada ah.
2. Guddiyada Joogtada Golaha waxa ay ku sameys-mayaan baahida shaqo ee Golaha.
3. Guddiyada Joogtada Golaha waxaa soo jeedinaya Guddoonka Golaha, waxaana codka kalsoonida siinaya Golaha Wakiillada.

### Qodobka 39aad: Kal-fadhiyada Golaha Wakiillada

1. Golaha Wakiillada xilka waajib-gudashadiisa waxa uu ku gudanayaa Kal-fdiyada Golaha.
2. Kulamada Caadiga ah ee Golaha Wakiillada waxa ay ka dhacayaan Xarunta dhexe ee Golaha.
3. Golaha Wakiilladu waxa uu yeelanayaa Seddax (3) Kal-fadhi oo Caadi ah Sanadkiiba, min (2) laba Bilood, iyo Fadhiyo aan Caadi aheyn.
4. Wakiil kasta waxa uu ka hawl-gelayaa deegaan-doorashadiisa muddada u dhaxeysa labada Kal-fadhi.

5. Golaha Wakiillada waxa uu samey-sanayaa xeer-hoosaad uu ku guto xilka-waajibkiisa, anshax-marintaxubnaha golaha, waqtiga fasaxyada, nidaamka maamul ee golaha, soo jeedinada hindise-yaasha sharci, mooshinada, habka codeynta iyo xilliyada kal-fadhiyada.
6. Fadhiyada Golaha Wakiillada waxa uu ku ansaxayaa laba meelood meel hal-dheeri ah in ay fadhiyaan.
7. Golaha Waakiillada go'aanadooda waxa ay ku meel mariyaan cod aqlabiyad, hal dheeri ah 50+1, xubnaha fadhiya marka laga reebo qodobada fadhiyada ku saabsan kalsooni siin ama kala noqosho xukuumadda, Guddoonka Golaha iyo Mooshinada ku saabsan xaaladaha deg dega ah.
8. Fadhiyada golaha waxaa looga yeeri-karaa xubnaha xukuumada iyaga oo warbixin looga dhageysanayo, ama su'aalo lagu weydiinayo, ama ay ka soo jeedinayaan qorshaha miisaaniyada xukuumada, ama hindise-sharciyeed.
9. Fadhiyada Golaha Wakiillada waxa ay albaabadooda u furayaan warbaahinta haddii aan guddoonka goluhu hakin, muwadiniintuna waxa ay dalban-karan waqtiyo cayiman in ay dhageysi u yimaadaan doodaha golaha wakiillada.
10. Fadhiyada aan caadi aheyn waxaa isugu yeeri kara:
    (a) Guddoomiyaha Golaha Wakiillada;
    (b) Markii uu dalbado Madaxweynaha DGGM, ama;
    (c) Ay dalbadaan seddax meelood meel Golaha Wakiillada

## Qodobka 40aad: Xasaannadda Xildhibaanka Golaha Wakiillada

Xildhibaanka golaha wakiillada lama xiri karo, lama baari-karo hoygiisa, gaarigiisa,xafiiskiisa iyo dukumiintigiisa haddii uusan dembi cad faraha kula jirin;

a. Xildhibaanka dembi loogama dhigi karo, lagumana dacweyn karo, ra'yiga uu ka cabbiro mimbarka golaha wakiillada dhexdiisa.
b. Xildhibaanka dacwad faldambiyeed ahlaguma oogi karo ilaa laga qaado xasaanadda, waxaana cod 50+1 uga qaadi kara golaha wakiillada,
c. Xildhibaanka waa lagu oogi karaa dacwad madani ah iyada oo aan laga qaadin xasaanadda.
d. Xildhibaankii laga qaado xasaanadda ee lagu oogay dacwad ciqaabeed laguna waayo, waxaa uu yeelanayaa mag-dhaw u dhigma sharaftii laga qaaday iyo in uu sii wato xilkiisa.
e. Xildhibaanka lagu xukumo dambi ciqaabeed gaaraya (2) sano si kama dambeys ah, waxa uu weynayaa xildhibaannimada, guddoonka ayaana shaacinaya in kursigaas loo soo tartamo.

## Qodobka 41aad: Dhaarta Dastuuriga ah

1. Xildhibaanada, Madaxweynaha, Madaxweyne kuxigeenka, Xubnaha Xukuumadda iyo Xubnaha Guddiyada Maxa-bannaan waxaa lagu dhaarinayaa Dhaarta Dastuuriga ah, isaga oo dhahaya;

   "**waxaan ku dhaaranayaa magaca Alle in aan xilkayga u gudanayo si daacad ah oo danta diinta, dadka iyo dalka ku jirto, dhawrayana dastuurka DGGM iyo kan Qaranka iyo shuruucda kale ee dalka**".
2. Dhaarta waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee DGGM.

## Qodobka 42aad: Kala dirista Goloha Wakiillada

Dhammaadka Mudda Xileedka Golaha Wakiillada Galmudug ee ku xusan Qodobka 32aad ee Dastuurkaan waxaa kala diraya dhaarta Golaha Wakiillada Cusub ee lasoo doortay.

## Qodobka 43aad: Guddoomiyaha iyo ku xigeenada Golaha Wakiillada

1. Golaha Wakiillada DGGM waxa uu yeelanayaa guddoomiye iyo gudoomiye kuxigeenno.
2. Xilka Guddoomiyaha Golaha Wakiillada;
   a. Waxa uu Guddoomiyaa Fadhiyada Golaha Wakiillada.
   b. Waxa uu u qeybiyaa doodda xubnaha Golaha Wakiillada.
   c. Waxa uu ilaaliyaa habsami u socodka shirarka iyo ku dhaqanka dastuurka iyoXeer-hoosaadyada Golaha.
   d. Waxa uu Guddoomaa soona hordhigaa Mooshinada ay soo jeediyaan xubnaha Golaha si waafaqsan dastuurka iyo xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada.
   e. Waxa uu ku dhawaaqaa natiijada kasoo baxday codeynta Golaha Wakiillada.
   f. Waxa uu sii hayaa xilka Madaxweynaha xilliga ay Galmudug ka maqanyihiin Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka.
   g. Marka uu Guddoomiyuhu ka maqanyahay Kal-fadhiga Golaha ama Galmudug, waxaa xilkiisa gudanaya Guddoomiye ku xigeenka 1aad
   h. Haddii Guddoomiyaha iyo ku-xigeenka 1aad ka maqanyihii kal-fadhiga ama Galmudug, waxaa xilka Guddoonka Golaha gudanaya Guddoomiye ku-xigeenka 2aad.

## Qodobka 44aad: Qaab-Dhismeedka Golaha Fulinta

1. Golaha Xukuumadda DGGM waxa uu ka koobmaa; Madaxweynaha DGGM, Madaxweyne ku-xigeenka iyo Wasiirada.
2. Hannaanka DGGM waxa uu noqonayaa hannaan isku dhafan (Semi- presidential system).
3. Golaha Xukuumadda waa wadajirka Wasiirada, Wasiir ku xigeenada, Wasiiro dawle-yaasha, Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka DGGM.

### Qodobka 45aad: Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka DGGM

DGGM waxa ay yeelanaysaa Madaxweyne iyo ku xigeen lasoo doorto; Madaxweynaha iyo kuxigeenkiisa waa la isla dooranayaa, iyada oo doorashada Madaxweynaha la hormarinayo.

### Qodobka 46aad: Shuruudaha Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku-xigeenka

Xilka Madaxweynaha DGGM waxaa isu soo sharraxi kara Muwaadin kasta oo buuxiya shuruudahaan;

(a) In uu yahay Muwaadin Soomaali ah, kana soo jeeda Deegaannada Galmudug, ahna Muslim ku dhaqma Diinta Islaamka.

(b) In Caafimaadkiisa Maskaxeed uu taam yahay.

(c) In Da'diisu aysan ka yareyn 40 sano kana weynayn 75 sano.

(d) In uu leeyahay aqoon aan ka yareyn heer Jaamacad ama waayo-aragnimo hoggaamin iyo maamul khibradeed aan ka yareyn 5 sano.

(e) In uusan ku dhicin xukun kama dambays ah ee dambi-ciqaabkiisu gaarayo (2) sano.

(f) In aan Maxkamadi ku xukumin xad gudub ka dhan ah xuquuqda aadanaha.

### Qodobka 47aad: Doorashada Madaxweynaha DGGM iyo Ku-xigeenkiisa

1. Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug waxaa dooranaya Golaha Wakiillada GM.
2. Ugu yaraan seddax meelood laba tirada guud ee Golaha Wakiillada GM waa in ay joogaan u codaynta doorashada Madaxweynaha DGGM iyo Ku xigeenkiisa.
3. Musharraxa waa in ay usoo jeediyaan fadhiga Golaha Wakiilada ugu yaraan toban (10) Xildhibaan oo ka mid ah Golaha Wakiillada GM.
4. Musharrax Madaxweyne kasta waa in uu Musharrax-nimadiisa soo gaarsiiyaa Golaha Wakiillada GM una soo bandhigaa barnamijkiisa doorashada Golaha Wakiillada GM, kadibna la raaco hab-raaca soo socda;
   a. Codeynta doorashada Madaxweynuhu waa qarsoodi;
   b. Golaha Wakiillada GM waxa ay Madaxweyne u dooranayaan Musharraxa ku guuleysta aqlabiyad seddax meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada GM.
   c. Haddii musharrax ku guuleysan-waayo waxaa codayn labaad loo qaadayaa afarta musharrax ee ugu cod-badan waxaana ku guleysanaya Madaxweyne-nimada Musharraxa hela aqlabiyad ah seddax meelood laba (2/3) codadka tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada GM.
   d. Haddii Musharraxna ku guleysan-waayo cod-bixinta wareegga laabad waxaa cod-bixin wareeg seddaxaad loo qaadayaa labada Musharrax ee ugu cod badan waxaana Madaxweyne-nimada DGGM ku guuleysanaya Musharraxa hela cod hal-dheeri (50+1) tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada GM.

5. Doorashada Madaxweyne Ku-xigeenga DGGM waxaa loo marayaa hab-raaca doorashada Madaxweynaha.

### Qodobka 48aad: La Wareegidda Xilka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa

1. Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa waxa ay xilka la wareegayaan marka lagu dhawaaqo natiijada rasmiga ah ee codeynta, lana mariyo dhaarta ku xusan qodobka 41aad ee dastuurkaan.
2. Madaxweynaha la doortay waxa uu xafiiska la wareegayaa 30 cisho gudahood kadib marka xilka Madaxwyne-nimo loo dhaariyo.
3. Madaxweynaha iyo ku xigenkiisa waxaa loo sameynayaa xaflad caleemo-saar xilliga dhaarta.

### Qodobka 49aad: Muddada Xilka Madaxweynaha

1. Madaxweynuhu waxa uu xilka hayn-karaa muddo 5 sano ah, markalena dib ayaa loosoo dooran-karaa, laba xilli kabadanna lama soo dooran-karo.
2. Madaxweynuhu Xafiiskiisa iyo Deegaanka DGGM kama maqnaan-karo wax ka badan 45 Cisho, Wixii ka badanna waxaa loo aqoonsanayaa xil gudasho la’aan joogto ah.

### Qodobka 50aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Madaxweynaha DGGM

Madaxweynaha DGGM Waa;

1. Hoggaamiyaha DGGM iyo Madaxa Xukumadda GM.
2. Waxa uu Matalaa Midnimada Dadweynaha DGGM.
3. Waxa uu shir-guddoomiyaa fadhiyada Golaha Wasiiradda.
4. Waxa uu soo dhisaa Xukuumadda, Magacaabaa Wasiirada, Xilkana ka qaadaa markii uu la tashado Madaxwayne ku-xigeenka.
5. Waxa uu Magacaabaa Saraakiisha sare, xilkana ka qaadaa markii ay soo jeediyaan Golaha Wasiiradu.
6. Waxa uu Saxiixaa Heshiisyada lala gelayo Dawlad Gobaleedyada ka midka ah JFS, iyo Dawaladda dhexe ee JFS.
7. Waa Taliyaha guud ee Ciidamada Nabad-gelyada DGGM.
8. Waxa uu fidiyaa Saamaxaad iyo Cafis markii uu helo talo-soo- jeedinta Hay'adaha Garsoorka.
9. Waxa uu u xil-saaranyahay ilaalinta Dastuurka iyo Shuruucda heer DGGM iyo JFS.
10. Waxa uu Metelaa DGGM iyo Sshacabka Deegaanada Galmudug.
11. Waxa uu Bixiyaa Billad-sharaf iyo abaalmarin heer DGGM.
12. Waxa uu Saxiixaa Xeerarka iyo Shuruucda uu Ansixiyo Golaha Wakiillada GM.

### Qodobka 51aad: Luminta Xilka Madaxweynaha

Madaxweynuhu waxa uu xilkiisa weynayaa marka;

1. Uu Geeriyoodo.
2. Uu caafimaad ahaan xilkiisa u gudan kari waayo.
3. Uu xilka iska casilo.
4. Iyo in xilka laga qaado.

### Qodobka 52aad: Xil ka qaadista Madaxweynaha

1. Golaha wakiillada waxa uu soojeedin karaan xil ka-qaadista Madaxweynaha marka uu ku sifoobo ku xad-gudbka Dastuurka DGGM iyo Shuruucda JFS.
2. Mooshin laga keeno Madaxweynaha, waxaa soo gudbin kara seddax meelood meel 1/3 Golaha Wakiillada GM.
3. Madaxweynaha waxaa xilka looga qaadi karaa Seddax meelood laba meel 2/3 tirada guud ee Golaha Wakiillada GM marka ay ka codeeyaan.
4. Haddii uu Madaxweynuhu banneeyo xilkiisa sababaha ku xusan Qodobada 51aad iyo 52aad, waxaa mudda xileedkiisa dhameystiraya Madaxweyne ku-xigeenka DGGM.

### Qodobka 53aad: Sii haynta Xilka Madaxtooyada

Xilka Madaxtooyada sida loosii haynayo;

1. Haddii uu Madaxweynuhu maqanyahay waxa sii haynaya xilka Madaxweyne ku xigeenka.
2. Haddii Madaxweynaha iyo ku xigeenku maqanyihiin waxaa Xilka sii haynaya Guddoomiyha Golaha Wakiillada.
3. Haddii Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu maqanyahay waxaa xilka sii haynaya Guddoomiye kuxigeenka 1aad ee Golaha Wakiillada.
4. Madaxda lagu xusay Qodobkaan hal mar kama wada maqnaan-karaan Deegaanka DGGM.

### Qodobka 54aad: Xilka Madaxweyne Ku-xigeenka

Xilka iyo Waajibaadka Madaxweyne ku-xigeenku waa;

1. Waa kaaliyaha Madaxweynaha.
2. Xilka Xafiiska Madaxweynaha ayuu qabtaa marka uu Madaxweynuhu ka maqanyaha Galmudug.
3. Madaxweyne ku xigeenka ayaa xilka kula wareegaya sida ku cad Qodobka 48aad faqradiisa labaad, waxa uuna xilka si rasmi ah u heynayaa ilaa laga gaarayo xilliga doorashada.
4. Madaxweyne ku-xigeenka waxa uu xilka hayn-karaa muddo 5 sano ah, mar kalena dib ayaa loo soo dooran-karaa, laba xilli kabadanna lama soo dooran-karo.
5. Haddii Madaxweynuhu banneeyo xilka sababaha ku xusan Qodobada 51aad Iyo 52aad, waxaa Xilka Madaxweynaha loo dhaarinayaa Madaxweyne ku-xigeenka muddo 30 Maalmood gudahood ah.

### Qodobka 55aad: Magaabidda Golaha Fulinta

1. Golaha Fulinta DGGM waxaa soo magacaabaya Madaxweynaha DGGM.
2. Golaha Wasiirada ee uu soo magacaabo Madaxweynuhu waxaa codka kalsoonida ku ansaxinaya Golaha Wakiillada, Aqlabiyad hal-dheeri ah.
3. Soo magacaabidda Golaha Fulinta iyo Ansaxintooda waa in aysan dhaafin 45 cisho marka xafiisaka uu la wareego Madaxweynuhu.
4. Golaha Wasiirada waxaa laga soo magacaabi-karaa xubin kasta oo buuxisa shuruudaha ku xusan Qodobka 56aad ee DDGGM, Gudaha Xubnaha Golaha Wakiillada iyo Bannaan-koodaba.

### Qodobka 56aad: Shuruudaha kamid noqoshada Golaha Wasiirada

Shuruudaha ka mid-noqoshada xubnaha Golaha Wasiirada;

a) In uu yahay Muwaadin DGGM, ahna Muslim ku dhaqma diinta islaamka.
b) In uu leeyahay aqoon waxbarasho heer jamacadeed iyo waayo aragnimo shan sano mas'uuliyad xileed ah.
c) In uu leeyahay ugu yaraan xirfad maamul oo gaarsiisan ilaa 5 sano shaqo ah.
d) In da'diisu aysan ka yareyn (25) sano.
e) In Xubinta loo magacaabayo Golaha Wasiiradu ay soo bandhigto hantideeda guurtada iyo ma guurtada ah ee ay leedahay.

### Qodobka 57aad: Xilka iyo Waajibaadka Golaha Wasiirada

Golaha Wasiirada waxa ay Mas'uul ka yihiin:

1. Fulinta Siyaasadaha Guud ee DGGM.
2. Horumarinta Dhaqaalaha, Arrimaha Bulshada, Nabad-gelyada iyo Xasilloonida guud ee DGGM.
3. Dejinta Qorshaha guud ee lagu Hormarinayo DGGM.
4. Dejinta Siyaasad Maaliyadeed iyo Maalgelinta Deegaanka iyo Kobcinta Dhaqaalaha.
5. Dejinta Miisaaniyad-sanadeedka iyo Xisaab-xirka Sanadka
6. Dejinta Hindise-sharciyeedyada iyo soo Hor-dhigidda Golaha Wakiillada.
7. Diyaarinta iyo Ansaxinta Xeerarka Maamul, iyo soo jeedinta Magacaabidda iyo Xil ka-qaadida Saraakiisha Sare ee DGGM.
8. Xiriirinta DGGM iyo Maamullada Goballada iyo Degmooyinka DGGM iyo Xiriirka Dawlad Gobaleedyada iyo DGGM.
9. Nidaamka Xiriirka iyo Wada-shaqeynta waxaa lagu Caddeynayaa Xeer gaar ah.

## Qodobka 58aad: Golaha Dhaqanka Galmudug

1. Golaha Dhaqanka Galmudug waa Gole dhaqan oo Madax-bannaan, kana kooban Dhaqanka soo jireenka Galmudug, waana Golaha ugu sarreeya arimaha dhaqanka Galmudug.
2. Goluhu waxa uu u xilsaaran-yahay xallinta khilaafaadka, dib u heshiisiinta, is dhex-galka bulshada deegaanada Galmudug, xiriirka Golayaasha Dhaqanka Soomaaliyeed iyo xoojinta arrimaha dhaqanka suuban.
3. Xarunta Golaha dhaqanku waa Magaala-madaxda Galmudug ee Dhusamareb, waxa ayna kulamadooda ku yeelan-kara dhammaan Deegaanada Galmudug.
4. Astaanta Goluhu waa laba Bakoorad & Koofi dul-saaran.
5. Xuquuqda iyo Waajibaadka Golaha waxaa lagu caddeynayaa Sharci gaar ah oo ay soo jeediso Wasaaradda Arrimaha Gudaha DGGM uuna Ansixiyo Golaha Wakiilladu.

## Qodobka 59aad: Kamid-Noqoshada Golaha Dhaqanka GM

Shuruudaha kamid noqoshada Golaha Dhaqanku waa:

1. In uu yahay Muslim Sunni ah.
2. In uu yahay madax-dhaqameed soo jireen ah, aqoonsina ka haysta madax-dhaqameedka jufooyinka beeshiisa.
3. In uu caafimaad ahaan, jir ahaan iyo caqli ahaanba u gudan-karo xilkiisa.
4. In uu diinta iyo dhaqanka aqoon fiican u leeyahay.
5. In uusan horay ugu dhicin xukun ciqaabeed kama dambays ah, oo maxkamadda horteeda kaga caddaaday dambi.
6. In uu yahay xilkas, dhaqankiisu toosan-yahay.
7. In uusan ahayn shaqaale dawladeed.
8. Haddii ay banneyso xubin ka mid ah golaha dhaqanka xilkeeda waxaa soo buuxinaya xubin ay beeshiisu soo doratay.

## Qodobka 60aad: Tirada Golaha Dhaqanka Galmudug

Tirada Xubnaha Golaha Dhaqanka Galmudg waa 25, iska dhex dooranaya Guddoomiye, Guddoomiye-ku-xigeen iyo Guddi-hoosaadyo tirada loo baahanyahay.

## Qodobka 61aad: Awoodda iyo Waajibaadka Golaha Dhaqanka

Waajibaadka golaha dhaqanka Galmudug waxaa kamid ah:

1. Ilaalinta dhaqanka suuban ee bulshada Galmudug iyo dhawrista xeerarka dhaqanka.
2. Xallinta khilaafaadka beelaha iyo arrimaha dib u heshiisiinta.
3. U gudbinta golaha xukuumadda iyo golaha wakiillada Galmudug talooyin iyo tilmaamo wax ku ool ah oo lagu toosinayo siyaasadda iyo hoggaanka DGGM.
4. Gacan-siinta Xukuumadda ee arrimaha; nabad-gelyada, dib u heshiisiinta, is dhex-galka bulshada iyo xoojinta dhaqanka suuban ee bulshada.

### Qodobka 62aad: Fadhiyada Golaha Dhaqanka Galmudug

Fadhiyada Golaha Dhaqanka Galmudug waxaa lagu nidaaminayaa xeer hoosaad uu yeesho Goluhu.

### Qodobka 63aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Dhaqanka

Waayidda Xubinnimada Golaha dhaqanka Galmudug waxaa lagu soo saarayaa xeer gaar ah.

### Qodobka 64aad: Golaha Garsoorka Galmudug

1. Garsoorku waa Awood ka madax-bannaan hey'adaha; wakiillada iyo fulinta, waxaana maamulaya golaha sare ee Garsoorka.
2. Garsoorku waa ilaaliyaha iyo dhaqan-geliyaha shuruucda DGGM.
3. Hey'adaha garsoorku waxa ay u madax-bannaan-yihiin gudashada waajibaad-kooda garsoor.

### Qodobka 65aad: Qaab-Dhismeedka Garsoorka DGGM

Garsoorka DGGM waxa uu u dhisanyahay habka kala sarreynta Garsoorka ee Maxkamadaha:

(a) Maxkamadda Sare oo ah darajada ugu sareysa DGGM.

(b) Maxkamadaha Racfaanka ee darajada labaad ee Gobalada DGGM, Gobal kasta waxa uu yeelanayaa Maxkamad Rafcaan.

(c) Maxkamadaha Gobalka ee heerka darjada koowaad oo ka kooban; Maxkamadda Degmada iyo tan Gobalka.

(d) DGGM ayaa soo saaraysa Sharciga Garsoorka ee DGGM, oo ay ku qeexantahay ikhtisaasaadka Maxkamadaha.

### Qodobka 66aad: Howlaha Garsoorka DGGM

Garsoorka DGGM waxa uu u xilsaaranyahay gudashda waajibaad-kiisa ay ka mid tahay:

1. U gar-qaadidda dhinacyada.
2. Dhageysiga dacwadaha.
3. Ilaalinta dastuurka DGGM iyo dasturka JFS, iyo shuruucda DGGM iyo kuwaqaranka iyo qawaaniinta caalamiga ah.

## CUTUBKA AFARAAD

## HAY'ADAHA IYO GUDDIYADA MADAXA BANNAAN

### Qodobka 67aad: Hay'adaha Dawliga ee Madaxa-bannaan

1. Hay'adaha dawliga Madaxa-bannaan ee DGGM waa;
   a. Hanti-dhawrka guud ee DGGM.
   b. Xisaabiyaha guud ee DGGM.
   c. Guddiga shaqaalaha rayidka ee DGGM.
2. Awooda, xilka iyo waajibaadka hey'adaha dawliga ee ku-xusan qodobkaan, DGGM ayaa ka soo Saarreysa shuruuc khaas u ah hay'ad kasta.

### Qodobka 68aad: Guddiyada Madaxa-bannaan

1. Guddiyada Madaxa-bannaan ee DGGM waa Hay'ado ka Madax-bannaan Xukuumadda, Xakameyn Siyaasadeed iyo faragelin lagu sameeyo, Awoodna u leh in ay u adeegsadaan Aqoonta iyo Xirfada la xiriirta Hawlaha u gaarka ah.
2. Guddiyada Madaxa-bannaan marka ay gudanayaan waajibaad-kooda waa in ay tixgelin siiyaan xuquuqda aadanaha, dimoqoraadiyada, isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta.
3. Guddiyada Madaxa-bannaan ma hoos immaanayaan xukuumadda iyo hay'adaha dawliga kale, Miisaaniya-doodana waxaa lagu tilmaamayaa madax-gooni u ah oo ku dheggan Miisaaniyada guud ee DGGM.
4. Guddiyada Madaxa-bannaan ee DGGM waxa ay kala yihiin;
   (a) Guddiga sare ee Garsoorka
   (b) Guddiga la-dagaalanka musuq-maasuqa
   (c) Guddiga doorashooyinka
   (d) Guddiga xuquuqul-insaanka
5. Guuddiyada Madaxa-bannaan waxaa soo jeedinaya xukuumadda, waxaana codka kalsoonida siinaya Golaha Wakiillada Galmudug.
6. DGGM waxa ay ka soo saareysaa shuruuc qeexeysa hannaanka lagu asaasayo guddiyada ku xusan qodobkaan; awoodahooda iyo waajibaad-kooda shaqo.
7. DGGM waxa ay guddiyada madaxa-bannaan ee dastuuriga ah ku dhisaysaa muddo sanad gudihiis ah kadib maalinta la ansixiyo xukuumadda.

## CUTUBKA SHANAAD

## CIIDAMADA NABAD-GELYADA DGGM

### Qodobka 69aad: Dhismaha Ciimada Nabad-gelyada DGGM

1. DGGM waxa ay yeelanaysaa Ciidamo nabad-gelyo, oo kala ah;
   (a) Booliska DGGM iyo Birmadka Booliska
   (b) Nabad-Sugidda DGGM
   (c) Ciidanka Asluubta ee DGGM.
2. Sharci gaar ah ayaa lagu soo saarayaa qaab-dhismeedka iyo waajib-gudashada ciidan kasta ee DGGM.

## CUTUBKA LIXAAD

## DOORASHOOYINKA DGGM

### Qodobka 70aad: Heerarka Doorashooyinka DGGM

1. Sida ku xusan Qodobada1aad iyo 25aad ee Dastuurka DGGM iyo Qodobada 22aad iyo 47aad ee Dastuurka JFS; Shacabka Galmudug ayaa dooranaya Wakiiladiisa ku matalaya Siyaasadda si dimoqoraadi ah, daah-fura, oo ah xor iyo xalaal.
2. Muwaadin kasta oo buuxiya Shuruudaha uu sharcigu tilmaamayo waxa uu xaq uleeyahay in uu wax doorto, lana doorto.
3. Hannaaanka doorasho ee DGGM ayaa noqonaya Qof iyo Cod ku dhisan nidaamka Xisbiyada-badan, waxaana lagu qeexaya sharci gaar ah uu soo saaro GWGM.
4. DGGM ayaa qabannaya seddax heer-doorasho; Heer federaal, Heer DGGM iyo Heerka dawladaha hoose.
5. Guddiga Madaxa-bannaan ee doorashooyinka Galmudug ee ku cad Qodobka 68aad ee dastuurkaan ayaa u xilsaaran qabashada doorashooyinka Galmudug heerar-keeda kala duwan.
6. Go'aanada Guddiga Madaxa-bannaan ee doorashooyinka Galmudug waxaa burin-kara Garsoor madax-bannaan kaliya.
7. Guddiga Madaxa-bannaan ee doorashooyinka Galmudug oo gudanaya waajibaadkiisa ku xusan dastuurka iyo shuruucda Galamudug, waxaa la xisaabtamaya Golaha Wakiillada Galmudug.
8. Golaha Wakiillada Galmudug ayaa soo saaraya shuruuc iyo xeerar nidaaminaya arrimaha doorashooyinka Galmudug.

## CUTUBKA TODOBAAD

## XILLIGA KALA GUURKA IYO DHAQAN-GALKA DASTUURKA

### Qodobka 71aad: Ansixinta iyo Wax-kabeddelka Dastuurka DGGM

1. Ergada Golaha Ansaxinta ayaa si ku meelgaar ah u Ansixiyey Dastuurka DGGM.
2. Golaha Wakiillada ayaa awood u leh wax ka-beddelka Dastuurka.
   (a) Qodobada ku xusan Cutubka Koowaad iyo Cutubka labaad ee xuquuqul-insaanka, Golaha Wakiilladu waxba kama baddeli-karo, ilaa Dastuurka lagu Ansixinayo Afti dadweyne.
   (b) Qodobada wax ka-beddelidda Dastuurka waxaa soo jeedin kara afar meelood meel Golaha Wakiillada, waxaana ansixinaya laba meelood meel hal dheeri ah ee xubnaha Golaha Wakiillada Galmudug, Marka laga reebo qodobada ku xusan xarafka (a) ee qodobkaan.
   (c) Golaha Wakiilladu wax ka-beddelka dastuurka qodobada uu ku sameynayo sida; ku xusan Qodobka 71aad, faqradiisa 2aad (b), waxaa loogu dhaqmayaa si ku meel-gaar ah inta dastuurka afti dadweyne loogu ansixinayo.

### Qodobka 72aad: Dhaqan-galka Dastuurka DGGM

1. Dastuurkaan waxa uu awood dhaqan-gal kama dambeys ah yeelanayaa marka afti dadweyne loo qaado cod aqlabiyad ahna loogu codeeyo.
2. Dastuurkaan waxa uu dhaqan-gal ku meelgaar ah yeelanayaa marka Ergada Dhaqanka ee Dhismaha Maamulka Galmudug ku ansixiso cod aqlabiyad ah.
3. Golaha Wakiillada DGGM fadhigiisa ugu horreeya waxa uu kusoo saarayaa Mooshin lagu dhaqan-gelinnayo Dastuurka DGGM, cod aqlabiyad ahna lagu Ansaxiyo.
4. Muddada hirgelinta Aftida Dadweynuhu ma dhaafi karto laba mudda xileed “Term” oo ka billaabanaya mudda Xileedka xiga marka uu waxka-beddel-kaanu dhaqan-galo.

**LIFAAQYO (ANNEXES):**

LIFAAQA ERGADII ANSIXINTA

DASTUURKA DGGM

LIFAAQA (A):

Calanka DGGM



Astaanta DGGM



LIFAAQA (B):

***Erayada lasoo gaabiyey ee ku jira Dastuurkaan waxaa loola jeedaa sida ku hor qoran:***

a. JFS: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
b. JDS: Jamhuuriyadda Dimuqoraadiga Soomaaliya
c. DGGM: Dawlad Gobaleedka Galmudug
d. GMDG: Guddiga Madxa-bannaan ee Doorashada Galmudug
e. DDGGM: Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug
f. DJFS: Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya
g. KMG: Ku meel-gaar
h. GWGM: Golaha Wakiillada Galmudug